JAMHUURIYADA DIMUQRADIGA CE SOOMAALIYA

JIDKA LOO SOO MARAY FALSAFADA RUNTA AH

WAXAA SOO TARJUMEY OO ISKU SOO MIN-GUURSHEY:

JAALLE: MAXAMUUD CABDI DHUNKAAL.

1977

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

JIDKA LOO SOO MARAY FALSAFADDA RUNTA AH

Waxa soo turjumey oo
isku soo minguurshey
Jaalle Maxamuud Cabdi Dhunkaal

Muqdisho,
1977.

PJ
2534
.M48
J54
1977

RSCH
AFD9185

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

JIDKA LOO SOO MARAY FALSAFADDA HUNTA AH

Waxaa laga soo qoray Buugagga Af Ruushka ku qoran ee la yiraahdo (Najalni Kurs Filosofii)- Bilowga Duruusta Falsafadda, iyo (Osnofi Filosofiskikh Snanii-)-Asaaska Aqoonta Falsafadda, ee labaduba Mosko ka soo baxeen 1966, waxana qoray Culumo Soviet ah.

Waxa soo turjumey oo
isku soo minguurshey
Jaalle Maxamuud Cabdi Dhunkaal

Muqdisho,
1977.

Falsafaddu waa qaab khaas ah oo ku saabsan garashada dunida, habka afkaarta ee gnud ahaan, ku saabsan mashaakilka jirista iyo garaadka, waliba ku sii saabsan xidhiidhka fekerka iyo jirista, ruuxa iyo dabeecadda oo ka kooban waxyaabaha gundhiggeeda ah.

Falsafaddu waxay ka qid tahay qaabka garashada bulshada, Ideelojiyadu waa saab saarka mujtamaeyada dabaqaadka leh, iyo aragtida hadba dabaqad uun.

Falsafaddu laba weji bay mar walba leedahay: Kan hore waa marka soo horreeyey -wax ama ruux, jiris ama feker. Filoosofiinta qabta wax, dabeesad iyo jiristu in ay soo horeysey, ruux, garaad, iyo fekerkuna dambeeye waxay ku jiraan xerada maadiyeenta (Materialist). Filosofiyiinta qabta in uu soo horreeyey garaad, feker iyo ruux waxay ku jiraan idealiska xeradiisa. Waxaase layaku hayaa, kee baa asaasi ah?

Falsafaddu waxay ka hadashaa in qofku garan karo iyo in aanu garan karin waxa ku xeeran oo jira oo objectivka xaqiiqada ah.

Materialisku waxay qabaan in aan dunida cidna abuurin in ay weligeed jirtey, jirina doonto weligeed, iskuna mid tahay noocyuna badan tahay.

Waxay qabaan oo kale in ashyaada iyo ifafaalaha materialka ihi oo innaku xeeraani aanay cidna ku xidhneyn, kuna jirto isbeddello (processes) had iyo jeer iyaga oo aan cidna garaadkoodka ku xidhnayn. Matirialisku waxay qabaan oo kale in afkaarta, garaadka iyo ogaalkuba maskaxda oo material ah, oo reflection ka keenaysa wixii jira tahay, aan kana go'i karin wixii jira.

Idealisku laba ayuu u qeybsamaa kuwa subjective ah oo naftiisa ka ambaqaadaya iyo kuwa objective oo wax ka debedda ah ka ambaqaadaya.

1) Subjectivisku waxay qabaan in wax waliba ku yimaadeen jirista qofka iyo dareenkiisa. Haddii kale waxba ma jiraan bay ku murmaan.

2) Objectiv idealisku wuxu qabaa in ay jirto fekrad weyn oo wax walba ka sarraysa oo absolute ihi oo sideeda u dhammeystiran waxa kale oo dhan abuurtay.

Waxa iyana muhiim ah habka (Method) falsafaddu u deristo dunida innaku nooran. Haddaba haddaynu fiirinno tariikhda falsafadda waxa jira laba hab (method) oo iska soo horjeeda oo loo fekero. Labadu waa dialiktikada iyo metafisikada.

Dialektiksku waa cilmiga qawaaniinta guud ahaaneed oo xukunta koriinka dabeecadda, bulshada iyo fekerkaba. Taariikhda kelmedduna wax bedan hay isbed-beddeshay. Markii hore wuxu ahaa micnaha kelmeddu fanka doodda iyo muranka. Taas oo ahayd (a) Su'aal iyo Jawaab, (b) In la kala sooco fekredaha, wax kastana loo kala geyniyo genera iyo species (wax abuurka iyo wixii jira).

Dialektidada filosofiintii hore midba wax buu ku sii daray ama ideeliska ha ahaadeen amaba meterialis ha ahaadeen ilaa Hegel. Waxse cilmi ahaan u caddeeyey Marx iyo Engels.

Metafisikska waa lagu isticmaalayey ilaa 2100 sano, (Aristotle). Micneheeduna hadba waa isbedbeddelaayey.

Imminka waxa loo yaqaan habka falsafadda oo ka soo horjeeda habka kale ee falsafadda oo dialektikada ah. Metafiskadu waxay leedahay waxa jira iyo ifafaaluhuba isma beddbeddelayaan, midina midda kale kuma xidhna; waxay qabtaa in aanay iska soo horjeedku (contridictionsku) ahayn iliisha tadawirka iyo korriinka dabeecadda iyo bulshadaba. Marx iyo Engels baa u horreeyey wax goldalooladeeda muujiyey oo tusay in tan saxa ihi tahay dialektikada madiga ah.

Materialism iyo dialektikada giriiggii hore.

Waagii cilmigu yaraa oo ay ahayd kala guurkii dhaqankii kowaad iyo is-addoonsigii ayaa Giriiggu wax bilaabeen, inkasta oo waddamada Bariga Masar, Babalon, Indiya, Shiina habka is-addoonsigu qarniyo badan ku soo horreeyey. Roem iyo Giriigna waa jirey.

Falsafaddu waxay ka soo baxday waddamadaas iyada oo ideolojiyadii ah kuwii wax addoonsanayey iyo addoonta oo dagaal xumi ka dhex socday oo laga cadaadinayey xagga dhaqaalaha iyo siyaasaddaba.

Addoonta iyo kuwa xorta ah oo masaakiinta ihi ma baranayn cilmi iyo falsafad toona oo dantaa ku khasabtay hawsha ugu xun inay galaan.

Kuwii dhaladka(Arestokratka) ahaa waxay ku gumeysanayeen diin iyo ideolism. Waxa jirey dad hore u socod ah oo xummaantaas ka dagaallami jirey. Halkaas baa waxa ka soo baxay dariiqooyin badan oo falsafadood.

Meelihii ay heerka sare ka gaadhay waxa ka mid ahaa Giriigga oo ururaday culuuntii falsafadda iyo tii dabiicida ahayd iyo afkaartii kale oo ka soo baxday Bariga.

Giriiggii horena way u sii mariyeen wax badanna way ku sii dareen falsafadda iyo cilmiga kaleba. Materialism iyo dialektikada way bilaabeen. Waxayna ahayd markii dhaqankii bulshooyinkii hore uu beddeley kii is-addoonsigu.

Filosofiintii Giriiggii hore waxay ahaayeen materialist (stikhini ah, waa wax iska yimi, waana Ruush), aana cilmiyaysnayn, waxayna isku dayeen in ay gartaan dunida oo dhan iyada oo mid ah, in ay helaan meesha asaaska u ah iyo ashyaada dabiiciga ihi waxay ka bilowdeen, Ninkii bilaabay materialiska oo Giriigga ahaa waxa lagu wadaa in uu ahaa FALES oo ku dhawaa (624 - 547 Ciise ka hor)wuxuna yidhi wax waliba biyo bay ka bilaabmeen oo u sal ah, wax walibana biyo bay ku noqonayaan. Waxa ku xigey ANAKISMANDR (610 - 546 CH) wuxu yidhi wax waliba Apeyron bay ka bilowdeen oo u ah sal. Wuxu yidhi waxay u qeybsantay wax iska soo horjeeda marka la midayona waxa ka abuurmaya waxyaabo kala jaad jaad ah oo soconaya.

Ardaygii Anaksimandr lana odhan jirey Anaksimen (588 - 525 CH) wuxu yidhi wax waliba dabayl baa u asaas ah oo ay ka bilawdeen, iyadu mar dab bay noqonaysaa, mar way adkaaneysaa, mar waa dabayl, mar waa biyo, marna waa dhagax oo way adkaan.

Waxyaabahaas oo dhan bay filosofiintii Giriiggu ku hadleen iyaga oo waxoodu male u badnaa bilmetel (Anaksimandr ,wuxuu yidhi wixii nooli oo dhami waxay ku yimaadeen qorraxda kulaylkeeda iyo qoyaan.)Waxay isku dayeen in ay helaan waxa keenaya onkodka, hillaaca, dhulgariirka, qorrax-madoobaadka, xiddigaha iwm.

Materialismka iyo dialektikada waxa wax ku leh Heraklit (544 - 483 CH), wuxu yidhi waxa u sal ah wax walba dab oo waxa jira oo dhan midaya oo dabiici ah. Wuxu yidhi "Dunidu waa mid, ilaah iyo dad toona ma samayn, waa jiri jirey, oo jirtaa oo weligeed waa jiri doontaa oo ku socooneysaa qawaaniin". Qawaaniintaas dabeecadda wuxu ku sheegay "Logoc" wuxu yidhi dunidu waa socod joogta ah oo waa qulqulaysaa. Taas waxa ugu wacan iska soo horjeedkeeda, iyo halgan. Inkasta oo tacabku hooseeyey iyo cilmiguba oo aannu wax badan garan karayn haddana, wax buu ka' gartay oo wuxu ahaa Filosofiintii Giriigga ee waagaas kuwii u horreeyey.

Materialismka waxa hore u sii mariyey Demokrit (460 - 370 CH), wuxuna ka mid ahaa addoonleydii aad u danaynaysay in hore loo mariyo ganacsiga iyo tumista birta.

Falsafadda iyo cilmiga kaleba Demokrit wax buu ka galay, waxase abaal loogu hayaa in uu asaasay ra'yiga dhismaha materiyada gudeheeda oo ay ka kooban yihiin saxarro yar yar oo badan oo aan muuqanayn (Atoms) oo weligood jira oo aan isbeddelayn, oo aan la dhaxgeli karayn, oo aan la qeybin karayn, oo seconaya, oo ay ka dhalanayaan dab, biyo, dabayl iyo ciid. Demokrit wuxu yidhi Atomsku waa waxa jira, hawada madhanina waa ma jirto. Wuxu ku khaldanaa in hawo jiri karto atom la'aan, laakiin qarniyo badan buu u ahaa cilmiga iyo falsafaddaba islays.

Demokrit wuxu yidhi garaadka dadku waa waxa jira oo atamyo raacaya oo la dareemayo sidaas buu hore ugu mariyey aragtida garaadka ee maadinimada, inkasta oo ay aad u hooseysey markii uu lahaa garaadku waa dunida jirta sawirkeedii.

Waxay soo marayaan buu yidhi atomyadu arag, maqal, ur, dhadhan iyo taabasho, wixii kalena caqli baa lagu garanayaa.

Dialektikada iyo materialismku sidaas buu talaaba talaabo ugu soo socday, dagaal xumina wuxu ka dhex jirey iyaga iyo kuwa idealizma iyo diiniyiinta ah waana kala laba dabaqadood, wuxuna halganku ku sii xumaaday markii

lagu dagaallamay taliska oo ay ku dagaallameen addoonleydii demokaratka ahayd iyo addoonlaydii Aristokratka ahayd ama dhaladka sheeganeysay (V-IV CH).

Waxa dagaalka dhinaca idealismku ka waday Platon (427 - 347 CH) oo ku wadey materialismka oo u raadinayey xukuumadda addoonleyda aragti ay wax ku xukumaan oo ku joogaan. Wuxu yidhi materialismku ilaah li'i bay ku beerayaan addoonta iyo dhallinyarada oo waa innaku kicinayaan. Ilaahna waxa u ahaa markaas kuwa xukunka haysta oo addoonta leh iyo hadba boqorkooda, oo jooga ama khiyaal (abstract) ah.

Wuxu sameeyey idealist objective ah oo yidhi feker baa jira, waxa kalena waa hadhkiisii, wuxu yidhi marka qalbigu ama iimaanku ama naftu kaa tagto meel kale buu ku noolaan doonaa.

Waxa jira buu yidhi caqligu kuma xidhna, wuxu isku qasay waa ilaah, idealism iyo diin. Wuxu yidhi waxba ha ka baadhina waxa materialka ah oo jira laakiin wax dunida ka gooni ah ka raadi garaadka. Wixii dibu-socod ah oo dhan baa ku isticmaalay fekerkiisa ilaa imminka.

Aristotal (384 - 322 CH) Buugag badan buu qoray, waxa ka mid ah "Metafisik" "Ruuxa" iyo kuwa kale oo badan. Dhaliil badan buu ku sameeyey idealismada Platon. Wuxu yidhi feker aad ka siibtay meeshii ama jidhkii oo jira ma jiro. Aristotal wuxu ku walaacay materialism iyo idealism dhexdooda. Wuxu yidhi materiada ayaa wax walba u sal ah laakiin materiyadu ma aha wax gooni u jira. Materiyadu ma dhaqaaqeyso haddaanay qaab yeelan. Qaabku waa jirista wax kasta oo guud ahaaneed iyo dhuuxeeda kewaad. Wuxu aad ugu qaldamay markuu yidhi ifafaale kasta oo dabiici ah garaad dhaqaajinaya baa ku jira. Wuxu yidhi qaab walba qaabkiisa guud waa ilaah, wixii rajci ah oo dhamina intaas bay ku isticmaalaan.

Aristotal wax badan buu xagga garaadka ka qoray, Kategoriyona qoray (tayo, tiro, lama huraan, kama iyo iwm), dialektikadana aad buu u daba galay, wuxu sameeyey "LOGIC" oo ilaa maanta lagu isticmaalo.

Mufakiriintii hore oo Giriiggu afkaar badan oo falsafad ah bay keeneen. Waxay raad ku reebeen hore-u-marka filosofiinta materialiska ahayd oo ku saabsan xagga dunida oo materi ahaan ku midaysan, xidhiidhka garaadka iyo

materiyada, dhismaha materiyada, malahoodii dialektikada dabeecadda, isbeddelka joogtada ah iyo hore u marka dunida, qawaaniinta dabiiciga ah oo wada ifafaale kasta iyo waxyaabo kale oo qiime leh oo badan.

DAGAALKA DARIIQOOYINKA FALSAFADDA EE WAAGA DHULGOOSIGA IYO BULSHOOYINKA BURJUWAASIYIINTA

Markii uu horumarkiisii is-addoonsiga joogsaday waxa beddelay dhulgoosi. Qarniyadii dhexe waxa gacanta sare oo wax hoggaaminaysa lahaa aragtida diinta iyo idealismka oo wada jira, ujeeddadooduna ahayd in uu waaro xukunka dhulgoostayaasha iyo kinisadaha. Wixii falsafado hore waxay ka qaateen wixii idealiste ahaa, falsafadiina waxa shaqo ka dhigtay Baaderiyaal. Falsafaddii Aristotal waxay ka siibeen wixi materialist ahaa, waxayna ku isticmaaleen wixii idealist ahaa oo u daneynayey kaniisadda ay ku qadhaabanayeen.

Jaalle Engels wuxu yidhi qarniyadii dhexe, cilmigii dabiiciga ahaa iyo falsafaddiiba waxa ku adeegtay diinta iyo feodaladii dhaladka sheeganayey. Saldhig cilmi ahna ma keenin, waxooduna wuxu ahaa iska dheh.

Fekraddaas waxa u cadcaddaa Akfinskii (1225 - 1274 Ciise ka dib) oo yidhi ujeeddadayadu waxa weeye in aan muujinno in mashiinka wax dhaqaajinayaa oo u sabab ihi, oo ah iliisha wax kasta oo lagama maarmaan ah, garaadka wax abuuraya ah, oo waxa jira kala sheegi kara waa Ilaah (Baaderigaasi sidaasu yidhi) inkasta oo waagaasu xumaa haddana wax jirey filosofiin yidhi materiyadu weligeed way jirtey.

Waagii dambe ee bulshada dhulgoosiga waxa koray tacabkii iyo cilmigii waana waagii burjuwaasiyadu dhalatay, waxana laga horyimi afkaartii dibu-socodka ahayd ee dhulgoostayaasha iyo Baaderiyaashu ku cabiidinayeen qarniyo badan dunida (XV-XVII CK).

Qarnigii XVII waxa materialismka hey u noqotay Iglan waana meeshii uu ugu horreyey kacaankii burjuwaasiga ahaa, waxana bilaabay Fransis Beykan (1561 - 1626 CD). Wuxu ka soo horjeestey wixii ay Iskuuladii Kiniisaduhu wadeen oo wuxu sameeyey habab lagu garto dabeecadda. Wuxu yidhi garaadka ayaa xoogga qofku ku jiraa. F.Beykan aad buu wax uga qabtay si uu dib ugu dhashe materiyaalismkii Giriiggii hore. Beykanna wuxu ku adkaystay in materiyadu leedahay socod, yahoon iyo ruux - nololeedba.

Beykan wuxu yidhi yaan diinta iyo cilmiga laysku qasin, mid walbana ha loo daayo shaqadiisa. Sidaas baa cilmigii ugu xoroobey diintii Kinisadaha, falsafaddii materiyaliska ahaydna talaaba talaabo uga baxday una riixday diinta iyo idealismkiiba.

Diintii Kinisaduhu wax ku cabiidinayeen iyo idealismkii iswatay dagaalkii ma joojin, halkoodiina kama dhaqaaqin, waxayna dagaal ku kiciyeen materialismkii iyo garaadkii hore u socodka ahaa, waxana soo baxay Baaderi caan ku ah subjective idealism Jorj Berkley (1685 - 1753 CD) oo Ingiriis ah, wuxuna yidhi materiya jirta oo innaga dareenkeena ka debedda ihi ma jirto. Wuxu yidhi wax objective ah ma leh dabeecaddu, wax qawaaniin ah oo ay ku soconaysaana ma jiro, laakiin wax soo gala jirka (subjektka) (perception) keli ah baa jira (Sensations), wax aniga iga debedda ahina ma jiro, lamana garan karo. Markii dambe wuxu yidhi feker ama caqli guud baa jira oo ilaah ah, oo sidaas istaagey maqaamka ah objective idealist. Wax badan baa Iskuulkiisa raacay. Wuxu yidhi wixii la xisi karo baa waxa jiraa ku dhan yihiin, wixii aan la garan ama aan la xisinina ma jiri karaan, wax aan caqli (Rational) keenin oo jiri karaana ma jiraan.

Haddii buu yidhi la yidhaahdo shay objective ah oo aan caqligaas ahayn baa jira ilaah li'i weeye. Sidaas buu dadkii ugu hanuuniyey kinisaddiisa wax dhiigmiirata.

Dabayaaqadii qarnigii XVII iyo XVIII khaasatan waxa dagaal ku kiciyey idealismka iyo diinta kinisadaha niman badan oo Yurubiyiin Burjuwaasiin ah oo aqoon leh, iyo kuwo materialis ahaa oo Faransiis ahaa oo ay ka mid ahaayeen Juuliyen Ofre Lametiri (1709 - 1751 CD) Dini Didro (1713 - 1784 CD), Pol Anri Golbakh (1723 - 1789 CD), Klog Adrian Gelefesii (1715 - 1771 CD).

Dagaalkaas materiyaliska Faransiisku ay kala soo horjeesteen wuxu si cad ugu xidhnaa halgankii burjuwaasiga ahaa oo siyaasiga ahaa. Dhalliilkii aan raxmada lahayn oo qaabkii bulshada dhulgoosiga, caadooyinkii dhulgoosatada, ideolojiyadii iyo siyaasaddoodiiba way burburiyeen waxayna dib ugu habowdey dunidii habkii hantigoosiga.

Burjuwaasiintu waxay aad u danaynaysey in tacabku degdeg hore ugu maro, si ay taas ku gaadhaanna waxa waajib noqotay in cilmiga ay hore u mariyaan. Talaabada cilmigu hore ugu marsba waxa is hor taagayey diintii, caadooyinkii idealiskii iyo qaabkii qarniyadii dhexe loo fekerayey oo dhan.

Kuwii ideolojiyada burjuwaasiyada waday sidii duufaankii bay cagta mariyeen habkii qarniyada dhexe iyagoo ku dagaallamayey magaca aqoonta iyo materialismka.

Iyaga oo la dagaallamaya kinisada iyo afkaarta idealismka ayaa waxay yidhaahdeen dabeecadda iyo nolosha bulshaduba waxay ku soconayaan qawaaniin dabiici ah. Waxa dunida isbedello ka socda oo dhami waxay ku imaanayaan sababo dabiici ah. Waxay yidhaahdeen wax aan materiya ahayn oo wax dhaqaajiyaana ma jiro. Waxay yidhaahdeen materiyada dabiiciga ah, si objective ah bay u jirtaa, sidaas awgeedna materiyadu waa dhuuxa, waa bilowga, waana waxa u salka ah waxa jira oo dhan, cid abuurtayna ma jirto, waana weligeed-jirto joogto ah. Wuxu yidhi HOLBACH, oo u dhashay markii hore JERMAL oo qoray Buugga la yiraahdo "LE SYSTEME DE LA NATURE" waa buuggiisii ugu qiimaha weynaa, Barlamaanka Faransiiska baa meel fagaare ah ku gubey, wuxu yidhi "Kuwa inna waydiiya xaggee baa materiyadu ka timi waxa lagu odhanayaa, weligeed way jirtey, socodka xaggay materiyadu ka heshay, waxa tidhaahdaan socodku waa jiristeedii iyo dhuuxeedii, marna weligeed ma joogsan".

Aad bay filosofiinta materialiska ahayd ee Faransiisku ula dagaallameen falsafooyinkii qaska ahaa, waxayna qabeen in dunida la garan karayo, hadda, waxa jirey in ay wax badan ku qaldanaayeen sidii Jaalle Engels caddeeyey.

Marka hore materialismkoodu wuxu u badnaa Makanikal. Maadaama heerka cilmigu uu ku ekaa makanikal oo aan aad loo furfurin biolojiyada iyo Kiimikada bay wixii kale oo dhan ku dabaqeen Makanikal.

Mar labaadka waxay makanikal ku noqdeen dabeecadda oo aanay u fiirin socodka korriinka taariikhda. Wax walbana waxay u haysteen oo dabeecadda ku soo mara wixii hore oo soo noqnoqanaya dialektikadana uguma isticmaalin xaggą dabeecadda iyo garaadka midna.

Marka saddexaad oo u dambaysa materialiskii faransiisku bulshada waxay u turjumeen si idealistnimo ah. Ma garan qiimaha tacabka, qawaaniinta objectiveka ah oo bulshada halgankeeda dabaqaadka oo u muftaax ah micnaha dabaqaadka bulshada iyo afkaartuba ka imanayso oo ah xidhiidhka dhaqaalaha.

Waxay moodayeen in dhulgoosatada caqli bedeli doono, oo ay asaas u tahay wanaag jacayl (Ideal)-sinnaan, caddaalad, xornimo iyo walaaltinnimo. Halhaysyadaasi waa kuwii lagu hirgeliyey kacaankii burjuwaasiga ahaa "Inminka baynu garanay, -buu yidhi Jaalle Engels- in Boqortooyada caqligu aanu wax kale ahayn illaa boqortooyadii burjuwaasiyada ,oo la wanaajey (idealisgareeyey) ma aha eh, caddaaladda waareysana waxay ula jeedeen in ay xalaalayaan sharciga jirista burjuwaasinimada oo isku dulnoolaanta iyo hantida hantigoosadka ah.

Dabaqaayadii qarnigii XVIII iyo bilowgii XIX waxa ka furmay idealismka iyo materialismka, metafiskada iyo dialektika ee Jarmalka halgan xanaf leh. Wuxuna ka turjumayey halgankaasu oo muraayad u ahaa isdiidada ku dhex jirtey bulshada. Markaasu waa markii ugu horreysey ee burjuwaasiinta Jarmalku si cad uga soo horjeesteen dhulgoosatada, si fulaynimo ah bay isugu dayeen in ay beddelaan dhaqanka dhaqaalaha iyaga oo aan samayn kacaan laakiin dhoob-dhoob (Refoms) samayaan, markaas Boqorkii way daayeen waxay kale oo la heshiiyeen (Compromise) ka galeen xaggii ideolojiyada.

Falsafadda Jarmalka ee waagaas waxa magaceeda la odhan jirey -CLASSICAL- dhawr wejina way lahayd. Wejiga idealismada waxa hoggaaminayey ninka la odhan jirey I. Kant iyo ninka la odhan jirey G.Hegel, dhinaca matafisika materialiska ahna waxa hoggaaminayey nin la odhan jirey Feyrbakh.

IMMANUAL KANT (1724 - 1804 CD) wuxu macruuf ku noqday in uu soo qaddimo ra'yiga cilmiga ah oo ku saabsan abuuritaan Habka qorexeedka (Nebular) oo uu yidhi qiiq buu ka bilowday, taasu dhirbaaxay ku noqotay kuwii metafiskiyiinta ka ahaa xagga dabeecadda.

Kant xaggiisa fiican waxa ka mid ahaa in uu yidhi shay waliba si objective ah buu u jiraa -waa iyagii, laakiin wuxu asaasay ra'yiga qaladka ah oo leh in aan dunida la garan karayn, wuxu daafacay ra'yiga (Agnostik) lama gartaan ah, wuxuna ku dooday in maskaxda dadku xadidantahay oo aanay awoodi karayn in ay garato dunida. Isaga oo taas wax ka sheegay Lenin wuxu ka yidhi asaaska sifaha falsafadda Kant waa in uu heshiisyo (Compromise) materialismka iyo idealismka oo isku daro falsafooyin ama dariiqooyin iska soo horjeeda oo hal hab iskaga dhigo. Marka uu leeyahay

malaheennu innama dhaafsana, "wax isla isagii ah" waa materialist. Marka uu yidhaahdo waxa lama garan karona (Trensendental) "waa idealist".

Waxa gudeheeda khilaaf ku jiraa, oo aan isku taxnayn falsafadda HEGEL (1770 - 1831 CD) oo wax weyn ka qabtay in uu isku dayey in uu isku daro dialetikada iyo idealismka objectivka ah.

Markii uu dialektikada wadey Hegel wuxu u jenjeedhey in uu dunida oo dhan -dabeecadda nolosha bulshada iyo fekerkaba- ka arko in ay tahay (process) hawl iswadda oo aan socodkeedu joogsi lahayn, oo isbeddel iyo horumar ah. Wuxu dhigay tiirarka asaasiga ah, qawaaniinta iyo kategoriyaasha dialektikada. Qodobbadiisa waxtarka ahaa waxa ka mid ahaa in uu yidhi horumarka dabeecadda bulshada iyo fekerkuba waxay ku xidhan yihiin isla qaynuunka dialektikada.

Hegel oo objective idealist ahaa wuxu yidhi ifafaale kasta oo yimaada ama soo mara dunida, dabeecadda ama bulshada waxa u asaas ah wax la yidhaahdo (Absolute idea) caqli ama feker dhammeystiran oo waa ruuxii dunida. Absolute idea ayaa u sal ah wax kasta oo jira bilaabayna.

Hegel wuxu yidhi dabeecaddu wax kale ma aha ee waa fekerkii oo isu muujiyey ama isu soo saaray jiris ama koritaankii heerarka ruuxa dunida, oo sidaas ku dhalaya dabeecadda iyo wixii **material** ah oo dhan waa ra'yigii oo aktiv ah. Siday u socotayna uu ku soo baxay qofku oo wax fekeraya oo ah **ideahii** oo iskaaay naftiisii -absolute idea haas- Hegelna waa waxa diimuhu yidhaahdaan ilaah.

Sida uu Hegel sheegayo mar baa waxa jirey "idea"-hii oo saafi ah, sidaas awgeed ka dunidu marbay bilaabatay oo fekerkii isu rogey dabeecad. Taas oo la yiraahdo objective idealism iyo dialektikaduna waxna iskuma soo dhacayaan oo iyadu waa socod joogto ah. Engels wuxu yidhi taasu waa isdiidada ku jirta falsafadda Hegel nafteeda oo uu in uu ku gudbo marna sameyn karo waayey.

Isdiidadaas dialektikada iyo idealismka habkooda ayaa dhowr jeer Hegel ku dabaqay xataa bulshada, taasuna waxay muujisay dabaqada Hegel ahaa naftiisu. Hegel wuxu ahaan jiray Filosofka (MONARCH) "Boqorkii Prusia", wuxuna tilmaamayey (Absolute Monakh) Boqorka keligi taliyaha ah, markaas wuxu sheegayey"absolute idea" caddaaday ama muuqaalkiisii ruuxa oo dhulka joogey oo boqorka ah.

Is-haysad la'aanta falsafadda objective idealismka Hegel ama idealisimka oo dhanba waxa muujiyey nin filosof ah oo mateiralis ah oo Jarmal ah LUDWIG FEYRBAX (1804 - 1872 CD). Wuxu aad u dhexgalay oo dhaliil weyn ku sameey-ey aqoontii oo ahayd in uu horrayo 'absolute idea' oo ay dambayso jirista ama dabeecaddu wuxuna caddeeyey in aanay wax kale ahayn ee ay tahay diinta kinisaddu waxay tidhaah-do dabeecadda ilaah baa samayey.

Isaga oo dhaliilaya idealismka, wuxu Feyrbakh muuji-yey in dabeecaddu tahay material, jirista dareenka iyo wi-xii jira oo dhan dunida xataa qofka iyo fekerkiisuba mat-eriyal yihiin, materiyaalkana cid abuurtay ma jirto, wel-geedna way jirtey wayna jireysaa. Wuxu yidhi Feyrbakh ko-ritaanka dabeecadda ayaa dadku ku soo baxay, wuuna fekeraa, fekerkana sinna loogama gooyn karo materiyada. Fekerkuna waa waxa ka soo baxa hawsha maskaxda. Feker kale oo aan kan dadka ahaynina ma jiro, mana jiri karo. Feyrbakh wuxu yi-dhi, wuxu feker jiraa ama yimaadaa marka wax jiraan dhab ihi waana taas midnimada jirista iyo fekerku.

Feyrbakh wuxu yidhi dunidu waa objective jira oo dh-ab ah, ashyaada iyo ifafaalahaba uu garaadkeennu sidii

muraayad u sawiraye, dabeecadduna waxay jirtey iyada oo aanay suuragal ahayn in qof jiro. Waxyaabaha dareenkeenna ku-nida, oo aynu ka mid nahay, waa tan xaqiiqda ah, oo dhabta ah, wixii kale waa idealism.

Inkasta oo Feyrbakh tusay idealismkii khaladka ahaa ee Hegel, haddana materiyalismkiisa dialektikadu waa ka maqnayd. Markaas Feyrbakh idealismkii iyo dialektikadii Hegelba waa isku xooray oo qiimaha u lahayd horumarka. Ma-tafisik materiyalis ah buu noqday Feyrbakh mana garan bul-sho-taariikheedka dhuuxa qofka ah iyo kaalintiisa ficilka ah ee bulshannimo. Qofka wuxu u arkayey biological laakiin ma arag in tacabku bulshada xukumayey. Feyrbakh waxa taa-riikhda wada buu yidhi dareenka iyo doonista dadka sidaas awgeedna ma garan, garashada bulshada nolosheeda ee mate-riyaliska ah.

KACAANKA KU DHACAY FALSAFADDA EE MARKISISMADU SAMEYSAY.

Cilmiga Falsafadda Marksismo-Leninismadu waa ka duwan tahay tayo ahaan wixii falsafado ka horreeyey iyo falsafa-dda burjuwaasiinta oo imminka joogtaba. Waxa samayey Marks iyo Engels, waxana sii fidiyey Lenin.

Falsafaddu waxay isugu jirtaa oo ka kawinantahay materialism iyo dialektiks. Waa aragtida midaysay dialektikada iyo materialismka iyo hannaankii ay ugu dabaqmaysey in la kaso ifafaalaha dabeecadda, bulshada iyo fekerkaba ama hindisaha. Kulligeed iyo qaabkeeda cilminimoba falsafada - aragti adduunyaad waa markii ugu horreysey taariikhda oo giddigeed ay u adeegto habganka kacaanka ah ee dabaqadda Shaqaalaha ah iyo Xoogsatada oo dhan.

Marksismku wuxu soo baxay 1840, oo ka soo baxay Germaniya, isaga oo ah ama ku soconayey qaynuun dabiici ah oo ka dhashay korriinkii cilmiga oo dhan iyo bulsho-taariikheedka praktikada ama ficilka ahaa. Waagaas bulshada hantigoosadka ah waxa ka soo ifbaxay isdiido iyo khilaaf gundheer ee habka tacabka hantigoosiga, waxa ka muuqatay gogoldhiggii (Objective) dhabta ahaa ee broletariyadku kaga xoroobi lahaa dhiigmiiradka. Halgankii dabaqiga ahaa ee Shaqaalaha iyo burjuwaasiyiinta ka dhex oogmey baa xanaf yeeshay oo sii kululaaday, ujeeddada halganku aad bay u caddaatay. Shaqaaluhu waxay u dirireen xuquuqdoodii dhaqaalaha iyo siyaasaddaba ahayd. Waxa marag ka ahaa kacaankii Shaqaalaha Fransiska ee Lione samayeen (1831 - 34), Shaqaalaha Germalka Silez ee dharka (1844), Shaqaalaha Ingiriis ee Chartist dhaqdheqaaqoodii (1830-1840).

Taariikhda goobahaas waxa ka muuqatay in Shaqaaluhu dabaqad ahaa si mustaqil ah u dilaeen hoggaaminta burjuwaasiyiinta iyo sii joogista habkooda dulmiga ahba. Dhaqdhaqaaqa kacaanka ah ee Shaqaaluhu wuxu u baahday in ujeeddada iyo waajibaadkooduba cilmiyaysnaadaan oo jidka dagaalku caddaado, la kala micnayo sida iyo qalabka lagu burburinayo habka Hantigoosadnimada, laguna dhisi lahaa bulsho cusub. Markism waxay noqotay aragtidii (theory) Shaqaaluhu ku muujinayeen dantooda. Isaga oo ah Shaqaaluhu dabaqadda ugu kacaansan casrigeenna, kuna diriraya danta Xoogsatada oo dhan.

Soo bixitaanka aragtida adduunka ee markismku ma aha micnaheedu in ay baabi'iso wixii cilmi ahaan dadku u soo gaadhey. Lenin wuxu yidhi iliisha aragtida markismku waa: falsafadii klasikada ahayd ee Germalka (I.Kant, Hegel, L. Feyrbakh), dhaqaalaha siyaasadda ee Ingiriiska (A.Smit, D. Rikardo), iyo Hantiwadaagga dhalanteedka ahaa ee Fransiiska (A.Sensimon, Sh.Furiye). Marksimku wuxu soo uruursaday wixii saxa ahaa ee dadku hore u soo sameyey. Sidaas bay u noqotay Ideolojiyada ugu kacaanyahansan ee waageenna.

Abuuritaanka dialektikada iyo materiyalismka taarikhiga ihi waxay ku xidhnaayeen sameysanka labada qeybood

oo uu ka kooban yahay Markismku-cilmiga Markismka ee dhaqaalaha iyo aragtida Hantiwadaagga cilmiga ah. "Haddii lagu camal falo dialektika materiyaliska ah marka la dejinayo siyaasadda dhaqaalaha dhammaanteed, iyada oo gunta ku haysa -taariikhda, cilmiga saynska ah, falsafadda, siyaasadda iyo taariikhda ama xeeladda, dabaqadda shaqaalaha, waa taas wixii Marks iyo Engls danaynayeen kacaanka Afkaarta". Lenin.

Taariikhda oo loo fahmey si dialektikada materialiska ah, furitaankii isdiidada hantigoosadnimada iyo qawaaniinta xukunta socodkiisa ayaa si cad waxay u qaawisey lama huraannimada jabka iyo baabigaadda habka hantigoosadka iyo lagama maarmaannimada taariikheed ee imaatinka kacaanka hantiwadaagga. Dhuuxa falsafadda kacaannimada waxa siiyey halganki Shaqaalaha ee Marks iyo Engels ay sida nasasha la'aanta ah uga qeyb qaateen.

Sameyntii habkii falsafadda iyada oo ah aragti-guudeedka asaaska u ah aragtida adduunka ee Shuucinnimada, Marks iyo Engels waxay wax weyn ka qabteen in ay ka gudbaan ceebihii ama ducfigii iyo waxyaabihii kaga sii hadhay idealismkii dialektikada iyo metafisikada materialismka iyo

in ay ka saareen wixii u dhexeeyey dialektikada iyo materialismka oo aanay samayn filosofiintii hore.

Wixii Marks ka horreeyey dialektikada iyo taariikhda materialism midna ma ahayn. Tii Hegelna way ka soo horjeeddaa sidii Marks naftiisu sheegay.

Markii Marks iyo Engels qorayeen materialismka dialektikada ah waxay ku [illegible]sadeen cilmigii dabiiciga ahaa ee qarniga XIX, waxana ka mid ahaa aragtida (cells) waxyaabaha jirku ka kooban yahay, qaynuunka kaydka iyo beddelaadda quwadda shidaalka, iyo cilmigii Darwin ee ahaa soo bixitaanka iyo korriinka waxa nool iyo waxa koraba, waayo cilmiyadaasu waxay beeniyeen tii matafisikada ee aan isbeddelayn.

Falsafadda Markismaduna ma aha materialismkii hore oo la soo nooleyey ee cilmiyadaas cusub bay ku isticmaaleen , waxayna dib ugu shaqeeyeen wixii matafisikada ku jirey oo dialektikadii ku dareen, kana dhigeen dialektika materialism oo ka dhigeen aragtida hubka u ah mabaadiida kacaanka ah ee dib loogu qorshaynayo qaabka dunida, waxayna noqotay heerkii ugu sarreeyey oo aqoonta dadku soo gaadhay, kacaanna ku ridey falsafaddii hore oo dhan.

Filosofiintii hore ee matafisikiinta ahaa waxoodu wuu xadidnaa, Marks iyo Engels-na waxay kooda ka dhigeen cilmi guud oo ku dabbaqeen bulshada korriinkeed iyo horumarkeed, dabeecadda iyo wixii jira oo dhan.

Falsafadda Marksismku waxay baadhaa oo hareer kasta ka fiirisaa waxyaha nolosha dabqaadka bulshada khaasatan tan shaqaalaha oo muujiyeen kaalinta dhabta ah ee dadweynaha xoogsatada ah ee ay taariikhda kaga jiraan oo si kacaannimo ah ugu hawlan yihiin, iyaga oo malyuuno ah.

Marksism-Leninism waxay midaysay aragtida cilmiga ah iyo ficilka kacaanka ah, falsafadda iyo siyaasadda. Marks wuxu yidhi filosofiintii hore duniday micnaheen, laakiin arrinta dulucdeedu waxay ku jirtey in la beddelo, waana taas tan micnaha u yeeshay Marksismka.

Cilmiga falsafadda Marksimku isaga oo ah habkii lagu garan lahaa oo loo dhaqan wareejin lahaa dunida aynu ku sii korayaa oo qaniinyo ku sii noqonayaa waayo-aragnimada kacaanka ah ee halganka Shaqaalaha. Marksismada korriinkeeda iyo horumarkeeda wax meel weyn ku leh Lenin oo Shaqaalaha Ruushka iyo kan dunidaba madax u ahaa, dhaliyeyna kacaankii

hantiwadaagga u horreeyey, dhisayna dawladdii u horreysay oo ah hantiwadaag.

Lenin wuxu aad u dersey cilmiga hantiwadaagga horena u mariyey xagga falsafadda, bulshada, dhaqaalaha iyo mujtamacii hantigoosiga iyo imberialiska ahaa ee dabayaaqadii XIX iyo awelkii XX. Wuxu lahaa taktikada Xisbiyada Shuuciga ihi ku dagaal galeen, sidii kacaan hantiwadaag ah loo dhalin lahaa loogana hirgelin lahaa waddanka Rushka iyo Kuwa kale iyo Programyadii Xisbiga Shuuciga ah, ee Ruushka.

Lenin dialektikadii buu ku dabbaqay wax walba oo siyaasad ah, dhaqaale ah oo ku xaliley dhibka haystay. Falsafadda Marksismkana waa dabaqey oo waxay u adeegtaa Shaqaalaha, waxayna ka soo horjeeddaa tan burjuwaasiintu waxay u taagan tahay.

WAXAY DERISTAA FALSAFADDA MARKSISM-LENINISMKU

Falsafadda Marksism-Leninismku waxay tahay aragti guud oo salka ku haysa aragtida adduunka ee cilmiga ah. Waxay deristaa qawaaniinta guud ee koriinka dabeecadda, bulshada iyo fekerkaba oo sidaas inoo siisay hannaanka guud ee afkaarta dunida.

Cilmiga falsafadda Markism-Leninismku waa ka duwan yahay cilmiyada kale oo dhan. Cilmi kale oo si sax ah uga jawaabi karaana ma jiro. Waxa materiyadu tahay; waxay dunida dabeecaddeedu tahay; sababaha iyo sida isbeddelku u yu socodo; waa maxay qof iyo fekerkiisu; sidee qof u kasay dabeecadda iyo bulshada; sidee bay dabaqado u dhasheen sideese u jiraan, Ummad, Dawlad, Cilmi, Asluub (Moral); ma jiri doonaa dagaal iyo kacaan; ma la hoggaamin karaa korriinka horumarka bulshada, waa maxay kaalinta taariikhiga ah ee dadweynuhu ka qaato kacaan, iyo abaaculaantooda iyo wacyi lahaantooda.

Dadku marwada kasi karaan falsafadda **mu**nta ah, su'aalahan oo kalena waxa ka jawaabi kara oo keli ah cilmiga aragtida adduunka ee dhabta ah - Marksism, kuwa aan cilmiga xaqiiqdiisa u dhaba gelini waxay yidhaahdeen sidaas qof waliba u gooni yahay ayaa afkaartiisuna ugu gooni tahay. Mana kasayaan, kuwaasu, in bulshadu isku xidhan tahay oo aan qofna gooni u yeelan karin mabda'a gaar ah ee ay afkaartu ka dhalanayso wada jirka, wada noolaanta, wada shaqaynta iyo wada hadalka iyo wax wada barashada oo hadba dabaqadda xukunka haysta ideolojiyadeeda la hiyi raaco.

Markaas, Markisismadu dunidu sida ay tahay bay u aragtaa, u deristaa oo u xalishaa mashaakilkeeda, waxna kuma daraan waxna kama reebaan.

Mar haddii la aqoonsado dunida materiyalinimadeed, oo horaynta materiyadu keenayso lagama maarmaanninada in la barto qawaaniinta korriinka dabeecadda iyo bulshada jiritaankooda oo barashadoodu tahay in la derso dialektikada materiyalnimada ah, taasoo u fiirinaysa ifafaalaha dunida oo dhan socod isbedbeddelaya oo aan joogsi lahayn. Isbedbeddeladaas oo noqon kara jaadad badan oo taabanaya sifo kasta iyo qaab kasta oo shay ama wax yeelan karaan oo gelaya samays kasta oo shay gaas ama waxaas gudihiisu yeelan karo. Isbedbedelkaas jaadadka badani wax nool iyo wax aan nooleynba ku imanayaan oo dabeecadda iyo nolosha bulshadaba ku imanayaan mar walba waxay leeyihiin ifooyin iyo qawaaniin guud ahaaneed, waana kuwaas kuwa dialektikada materiyalismku deristaa.

Qawaaniinta guud ee falsafadda deristaa waxba kama baxsana, dabeecadda iyo bulshadana wax waliba dialektikay ku socdaan. Waxa soo gelaysa fekerka naftiisa oo dialektikada lagu derso isaga oo fekerku ka soo baxayo maskax qof isaga oo qofka naftiisu ku yimi socodka iyo tadawirka dabeecadda iyo bulshada qawaaniinteeda. Waxyaabahaas objektivka ah baa fekerku ku imanayaa.

Qawaaniinta dialektikada marksismka (sida qaynuunka midnimada iyo halganka iska soo horjeedka, qaynuunka u gudubka tirada isu bedelaysa tayo, qaynuunka tirtiridda tirtiridda iyo kategoriyaashooda sida sababta iyo eelka"Cause and effect", qaabka iyo dhuuxa, lagama maarmaannimo iyo kama iyo kuwo kale) waxay muujinayaan sifooyinkooda guud iyo xidhiidhka abadka ah ee dunida isbedelka ku jirto ayey u yihiin aaladdii lagu kasayey (The Theory of Knowledege must be mentioned in this place).

Taariikhda materialismku waxay ina baraysaa qawaaniinta guud ee bulshada iyo sifooyinka ay ku soo ifbaxaan iyaga oo loo fiirinayo waayahooda taariikhiga ah ee kuran; waxay baadhaa xoogagga wada horumarka bulshada, qawaaniinta wadda korriinka tacabka, qawaaniinta halganka dabaqaadka iyo kacaannada; wuxu muujiyaa kaalinta iyo sida afkaarta bulshadu ku timaado, iyo hiyi qaadka ay ku yeeshaan socodka korriinka bulshada.

Sidaas awgeed falsafadda marksism-Leninismku waa cilmiga guud ee qawaaniinta korriinka dabeecadda iyo bulshada oo ku dhan aragtida adduunka ee dialektikada materialismka ka hadasha xaqiiqda, ahná habka garashada iyo beddelaadda adduunka.

Sidaas awgeed dialektikada iyo materialismka taariikhiga ihi waxay yihiin hannaanka guud ee lagu derso cilmiyada kale oo dhan.

Falsafaddu waa heerka ugu sarraya oo uu gaadhi karo cilmi guud ahaan oo wixii kale gebagabaynaya. Cilmiyada kale mid waliba kobtiisa keli ah buu wax ku baadhaa, kan falsafadda dialektikada iyo taariikhiga ah oo guud ahaan wax kasta oo dunida jira soo koobaya ma aha eh.

Xidhiidhka cilmiga dabiiciga ah iyo falsafaddu waxay aad u muuqdaan mararka waxyaabaha cusub la furo oo kuwii gaboobeyna burburayaan iyaga oo loo yiqiin cilmi ama fekred sax ah ama qawaaniin. Lenin wuxu buuggiisa "Materialism Embiriyokritisim" ku sheegay haddii aan la garan dialektikada ama aan la kala garan 'absolute' iyo 'relative' marka cilmiga fisikada la baranayo culumo badan oo waaweyn ayaa qaldamaya oo noqonaya idealistayaal, lamana dagaallami karayaan aragtida adduunka ee dibucocodka ah.

Haxa la habaabayaa haddii loo qaato falsafadda Marxismka, cilmiga cilmiyada oo cilmiyada kale oo dhan ka korreysa. Dialektikadu waxay ku xisaabtantaa oo soo gabagebaynaa waxyaabaha laga ogaado cilmiyada dabiiciga ah ee cusub, halkaas bay ka cabtaa oo ka tagtaa oo ka horjoogaa

qawaaniinteeda, garaadkeeda iyo kategoriyaashdedaba. Haddii aanay wada jirin falsafadda dialektika-materialiska ihi iyo cilmiga dabiiciga ihi oo aan kala maarmi karin iska daa horumar ay keento eh dabar bay ku noqon lahayd cilmiga sayniska -waxa yidhi Lenin.

Sidaa oo kale, waxa la mid ah cilmiyada bulshada oo darsaya nolosha mujtamacyada taariikh ahaan, dhaqaale ahaan, sharci ahaan iyo cilmiyada kaleeto oo ka hadlaya qawaaniinta korriinka taariikhda xidhiidhka dhaqaalaha, qaababka sharciyada iyo kuwa la midka ah.

Sidaas awgeed cilmi kasta ee bulsho, marka uu dersaayo qaynuunkiisa dabiiciga ah oo khusaysa kobta uu markaas baadhayo, iskama indhasaabi karo qawaaniinta guud ee korriinka bulshooyinka guud ahaan, waana qawaaniinta ay deristo materialismka taariikhiga ihi.

Haddii aan qawaaniintaas guud ahaaneed la garan marna lama garan karayo wada shaqeyntooda ay ka gelayaan dhinacyada badan ee horumarka bulshada.

Halkaas baa waxa ka dhalanaya mashaakilka badan ee hannaanka Bilmetel waa maxay xidhiidhka dhaqaalaha iyo siyaasaddu, cilmiga iyo tacabku, heerka korriinka tacabka iyo qaababka loo qeybsado midhaha materialka ah ee hawsha.

Qodobbadaasu waxay qiime mabdi'i ah u leeyihiin ma aha cilmiyada bulshada oo keli ah, ee waxay qiime u leeyihiin waxyaabo badan oo khusaya nolosha sidii loo xalili lahaa , bilmetel qorshaha dhaqaalaha, habka loo wado maamulka iwm.

Dialektikada iyo taariikhda materilismada ihi waxay kaa cawinaysaa in kasta oo uu adag yahay sifooyinka xidhiidka u dhexeeya dabaqadaha iyo dawladaha, lagama maarmaanimada kacaannimada loo dhaqan-rogayo bulshada hantigoosiga, siyaasadda cilmigu u sal yahay ee Xisbiga nooca cusub, xilka xisbiyada caalamiga ah iyo dhaqdhaqaaqyada shaqaalaha oo ku tiirsan falsafadda cilmiga ah iyaga oo ku xisaabtamaya xoogagga dabaqaadka jiraa meesha ay kala joogaan, xidhiidhka qoomiyaadka iyo waxyaabaha kale ee sidooda u jira ee saamaynaya nolosha bulshada iyo heerka wacyiga iyo abaabul-laanta xoogsatada.

Sidaas awgeed garashada falsafadda markism-Leninismku waxay laga maarmaan u tahay sidii guul (more) loogu marin lahaa cilmiyada qaarkood gooni u kuran iyo in la garto dhuuxa mashaakilka casrigan iyo sida ay u kala socdaan iyo wixii go'aan laga gaadhayo oo la dhaqan gelinayo oo dhan.

Waana sidaas awgeed waxa ay Marxism-Leninismku ku noqotay tirarka rukumada u ah dhismaha Hantiwadaag iyo barwaaqasooran.

Falsafadda aragtideedu ma aha loomana qaadan karo formulooyin la isku soo urursiyey oo sidooda u dhan oo wax qafilan (dogmo) ah, oo inta si makanik ah loo xusuusto hadba mid lagaga halqabsanayo meel ku habboon. Laakiin falsafaddu waxa weeye aragti ay tahay in si saxa loo fahmo oo analis iyo gebagebayn lagu sameynayo socoshka isbeddel-hawleedka (processka) iyo ifafaalaha dabeecadda iyo bulshadaba si dhab ahaan go'aan ficil (praktika) ah oo hawleed loogu xalilo.

Engels wuxu yidhi Marxismku ma aha dogmo, ee waa hogganintii waxa la falayo. Lenin wuxu yidhi haddii aan sidaas loogu camalfalin, naftii baa laga jaray Markismka.

Waxa inoo dhiman qawaaniintii iyo kategoriyaashii Falsafadda.

DHAMMAAD.